Layout 1 (Page 1) Created: 2/1/10 9:36 AM By: QuarkXPress(R) 8.02
2400.0 dpi (Screened Data File POS, Right Reading, Color Seps, Std OVT ) ( TRAP ABO:100 Scaling Percent: HT 100 WD 100 \rsi\lu ... 015 M:15097% Y:15080 K:15084% ) bleed: 0.125 margin size: 0.375
Cyan Magenta Yellow Black
ID: Mac1:

# Ku soo Dhowow

## Xarunta Ilaha Shaqada

*Ma shaqa ayaad raadinaysaa?*

*Ma waxa aad indho-indheynaysaa xirfado?*

*Ma waxbarasha ayaad ku talajirtaa?*

**Xarunta Ilaha Shaqada ee Sun Ray Waaxda Maktabadda waa meel adiga laguu sameeyay!**

**Waxa aad adeegsan kartaa macluumaad lacg-la'aana, fasallo iyo farsamo — kulligood waxaa loo sameeyay in ay adiga kaaga caawiyaan sida aad ku heli lahayd shaqo iyo xirfad aad rabto.**

*Maanta imaw!*

*Macluumaad dheeraada, ka wac Xarunta Ilaha Shaqada oo ah*

**651-501-6300**

2105 Wilson Avenue, St. Paul, MN 55119

# XARUNTA Ilaha Shaqada

### SAACADAHA

**Isniinta - Khamiista:** 10:00 subaxnimo - 9:00 habeennimo

**Jimcaha iyo Sabtiga:** 10:00 subaxnimo - 5:30 fiidnimo

**Axadda:** 1:00 duhurnimo - 5:00 fiidnimo

### TILMAANTA GAARIGA LAGU IMAANAYO

***Tilmaanta gaariga lagu imaanayo***

Soo qaado waddada weyn ee I-94 ugana bax McKnight Road (exit). Midig qaado oo dhanka waqooyi ugu soco addada McKnight illaa hal meegaar dhismo bidix qaado oo u leexo waddada Wilson Avenue. Kaddib laba meegaar dhismo, sii soco hal meegaar dhismo illaa ay maktabaddu mid kaa qobanaysa.

***Marka Laga Imaanayo Galbeedka***

Soo qaado waddada weyn ee I-94 ugana bax jidka Ruth Street (exit). Bidix qaado oo ku soco waddada Ruth Street illaa laba meegaar dhismo waddada Wilson Avenue kuna soco hal meegaar dhismo illa maktabaddda bidix kaa qabanayso.

**Waaxda Maktabadda Sun Ray**
2105 Wilson Avenue, St. Paul, MN 55119
www.sppl.org
**651-501-6300**

THE SAINT PAUL PUBLIC LIBRARY WORKplace
Your connection to job, career and small business resources
MAKTABADDA DADKA U DHAXEYSA EE SAINT PAUL XARUNTA SHAQADA
*Xiriiradaada shaqada, xirfadaha iyo ilaha shaqada*

SAINT PAUL PUBLIC LIBRARY
An agency of the City of Saint Paul
MAKTABADDA DADKA U DHEXEYSA ee SAINT PAUL

INSTITUTE of Museum and Library SERVICES
MACHADKA ADEEGYADA Matxafka iyo Maktabadda

Machadka Adeegyada Matxafka iyo Maktabadda waa hayad Federaala oo daadihinaysa fikradaha cusub, hogganka iyo nolol ku salaysan waxbarashada, iyo Adeegyada Maktabadda Gobolka (State Library Services), Hayadda Maktabadda Gobolka Minnesota (Minnesota State Library Agency), waxay taageertaa Xarunta Ilaha Shaqada (Job Resource Center) ee ku yaalla Sun Ray Library iyo maalgalin laga haysto Sharciga Adeegyada Maktabadda iyo Farsamda (Library Services and Technology Act – LSTA).

*Taageero dheeraada waxa bixinaya samafalka Trillium Family Foundation.*

THE SAINT PAUL PUBLIC LIBRARY WORKplace
Your connection to job, career and small business resources
MAKTABADDA DADKA U DHAXEYSA EE SAINT PAUL XARUNTA SHAQADA
*Xiriiradaada shaqada, xirfadaha iyo ilaha shaqada*



# XARUNTA Ilaha Shaqada

### WAAXDA MAKTABADDA SUN RAY

CMYK

Layout 1 [Page 2] Created: 2/1/10 9:36 AM By: QuarkXPress(R) 8.02
2400.0 dpi [Screened Data File POS, Right Reading, Color Seps, Std OVT ] [ TRAP ABS:100 Scaling Percent: HT 100 MD 100 \rsi\lu ... M:150% Y:150% K:150% ] bleed: 0.125 margin size: 0.375
Cyan Magenta Yellow Black
ID: Mac1:

X A R U N T A

# Ilaha Shaqada

***Waxaan diyaar kuugu nahay in aan kaa caawiinno sida aad shaqo ku heli lahayd xirfadana ku dhisan lahayd***



## La tasho xeel-dheeraha shaqa-raadista

Imaw la oo hadal la-taliyaha xirfadaha ka socda Goodwill/Easter Seals Foundation marka lagugu ballamiyo maktabadda. Ka qaado jawaabaha su'aalaha ku saabsan sida shaqo lagu raadsado, lagu qoro arjiga shaqada iyo warqadaha shaqa taageerista. Lacagla'aan. Looma baahnaa in ballan la qabsado. Wac 651-501-6300 raadso taariiqaha iyo waqtiyada.

## Qaado fasallo lacagla'aana

Fasallada xirfadaha iyo shaqa raadista waxaa lagu bixiyaa mowduucyo ah istraatejiyada shaqa raadiska, qoritaanka arjiyada lagu shaqo doonto, isku xiriirinta iyo wareysiga, sida lagu samaysto akawnka iimaylka iyo aad adiga si guul leh isku suuq-galisid si loo shaqeeyeyaasha aad isku fahamtaan. Fasallada oo dhan waa kuwo lacag-la'aan lagu bixinayo.

## Isticmaalka bilaashka ee adeegyada kombiyuutarka iyo fakiska

Marka aad shaqo doondoonayso, waxa aad isticmaali kartaa meelo gaara ee kombiyuutarka Internetka leh lagu adeegsanayo ee loogu talagalay rukunka Xarunta Ilaha Shaqada. Dirsashada fakiska ayay helayaan kuwa shaqo doonka ah.

## Dhiso nidaam qorshe xirfado ee adiga kuu gaara

Baro kartidaada, xirfadaha aad jeceshahay, iyo aqoonso mowduucyada aad mustaqbalka ku dhisanaysid iyo barnaamijyada waxbarashada laga helayo nidaamka Macluumaadka Xirfadaha Minnesota (Minnesota Career Information system – MCIS), oo ay dhistay Waaxda Waxbarashada Minnesota (Minnesota Department of Education). Waa nidaam ku salaysan Internetka oo ku daraya maalka xirfadda, macluumaadka waxbarashada iyo suuqa shaqada oo isugu keenaya hal nidaam oo midaysan, si fudud lagu isticmaalayo qalabka wax lagu qabsanayo. Marka aad kaashanaysid MCIS, waxa aad dhisan doontaa qorshe kuu gaara ee xirfadda iyo waxbarashada iyo tababarka aad u baahantahay si aad ku gaartid meeshaasi.



- Baro macluumaadka la xariira shaqooyinka
- Garo fursadaha waxbarashada iyo tababarka
- Baadigoob kulliyadaha/jaamacadaha iyo dugsiyada farsamada
- Raadso deeq iyo gargaarka waxbarashada
- Bilow shaqa-raadis iyo arjiga lagu shaqa raadinayo

## Baadigoob buugag, wargaysyada, DVD iyo waxyaabo dheeraada ee ku caawinaya

Xarunta Ilaha Shqada waxa ay bixinaysaa macluumaad ballaraan, ay ka mid yihiin, hagayaal iyo buugagga farsamada, wargaysyada toddobaadyada, fidiyoyaal iyo DVDs, ee ku taxluuqa manhajyada xirfadda, shaqa-raadista iyo mowduucyo kale ee la xariira oo tiro badan. Qalab badan ayaa kaga amaahan kartaa kaarkaaga makatabadda.

## Tallaabooyinka lagu gaarayo shaqa-raadis guul soo hoysa...

- **Dhiso qorshe shaqa raadis** ka koobaan ujeeddooyinkaaga iyo nidaamka aad u mari lahayd sida aad ku gaarto.
- **Soo uruurso macluumaad muhiima** ee lagu dhammaystirayo arjiyada shaqada iyo lagu dhisanayo arjiga shaqa-raadista, sida lambarka sooshal sekuuritigaaga iyo taariiqaha qalin-jabinta.
- **Is habee.** Samayso jadwal aad maalin kasta ku hawlgalyso, ama wax kale, si aad ula socotid dadka aad la xariirtay iyo talooyinka ay kuu soo jeediyeen.
- **Raadso macluumaadka meelaha shagada laga helayo.** Xariir joogta ah la samayso hayadaha, shaqaalaha xarunta ka shaqeeya, iyo qofkasta ee kaa caawin kara sida aad ku heli lahayd shaqoda iyo shaqo aad adiga rabtid.
- **Meel isugu keen loo shaqeyayaal muhiima.** Baadigoob waxa ay shirkaddu soo saarto ama adeegyada ay bixiso kahor inta aadan dalban. Qaabkaas, waxa aad ku heli doonta maalcuumaad kugu filan ee aad ku weydiinayso su'aalo caqligala dadkuna ka samaystaan fikrad fiican.
- **Dhiso arji shaqa-raadis bannaanka u soo saaraya waxyaabaha aad ku fiicantahay,** waaya aragnimada, waxbarashada iyo xirfadaha (xariifnimada).
- **Isu diyaari waraysiga aad shaqada ku heli lahayd.** Isu diyaari si guul leh in aad warbixin fiican isaga bixisid dadka aad shaqo ka rabto iy inta uu waraysiga soconayo.
- **Sii wad xariirka aad la leedahay loo shaqeeyaha.** Warqado u qoro ama dadka aad la xariirto wac si aad uga mahadcelisid caawimaaddooda. Waxaa kale fiican in aad u dirtid warqado mahadcelina shirkadaha fursad kuu siiyay in ay ku waraystaan ama dadka aad u isticmaashay in warbaxin fiican kaa bixiyaan.

***Wac si aad macluumaad dheerada ku hesho...***

**651-501-6300**

**Waaxda Maktabadda Sun Ray**
2105 Wilson Avenue, St. Paul, MN 55119

CMYK